



## Doorashada qorshahaaga caafimaad wuxuu noqon karaa mid fudud.

Isticmaal xaashidan iyo warqadan uu Qorshaha Caafimaadka Oregon kuu soo diray Oktoobar si ay kaaga caawiso in aad doorato qorshaha CCO ee ugu fiican ee adiga iyo qoyskaaga. Qorshaha CCO oo kastaa wuxuu leeyahay dhakhaatiir, isbitaalo iyo farmashiiyayaasha kala duwan. Saddex tallaabo oo sahlan, waxaad ku heli doontaa dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u gaarto doorashada iyo isqorida qorshaha caafimaadka ee ugu wanaagsan.

**Xaashidan waxaa loogu talagalay xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool meelaha kala doorashada qorshayaasha CCO ay isbeddelayaan.**

### Tallaabada 1 Tixgelin siinta

Dib u eeg warqadaada ama booqo internet-ka [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov) si aad u hesho qorshayaasha ka jira degaankaaga. **Qorshayaasha aad kala dooranayso:**

Doorashada 1 \_\_\_\_\_

Doorashada 2 \_\_\_\_\_

Doorashada 3 \_\_\_\_\_

### Tallaabada 2 Isbarbar dhiga

**Liiska dhakhaatiirta, isbitaalada iyo farmashiiyayaasha aadka muhiimka kuugu ah.** Qorshaha CCO oo kasta, ogow in dhakhtarka ama xaruntu ay ka tirsan tahay nidaamka qorshaha. Tani waxaad ku samayn kartaa adiga oo wacaaya xafiiska dhakhtarka ama qorshaha CCO, ama booqanaya website-ka qorshaha. Si aad u soo koobto kala doorashadaada, waxaa laga yaabaa in aad sidoo kale rabto adeegyada dheeraadka ah ee qorshaha. Booqo [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov) si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato qorshaha CCO oo kasta.

Dhakhaatiirta, isbitaalada iyo farmashiiyayaasha muhiimka kuu ah.	Waa kee CCO ay ka qayb qaataan

## Tallaabada 3 Doorashada

### Magaca qorshaha adiga kuu fiican:

Haddii kani yahay qorshaha OHP ay ku barbar dhigtay, **ma aha inaad wax sameyso**. Waxaa si toos ah lagu qori doonaa qorshahaaga lagu barbar dhigay.

Haddii aad rabto in aad doorato mid kale oo la kala dooranayo, samee mid ka mid ah kuwa soo socda:

 **Mida ugu dhakhsaha badan ee la kala dooranayo: Waxaad beddeshaa qorshahaaga internet-ka.**

1. Booqo <http://bit.ly/CCOchoice>.
2. Isticmaal Aqoonsiga Warqada 'Letter ID' si aad u gesho. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa lambarka aqoonsiga OHP oo ka socda OHP ama kaarka CCO. Haddii aad lumisay warqadaada isla markaana aadan haysan Aqoonsiga Warqada 'Letter ID' waxaa u baahan doontaa in aad isticmaasho mid kale oo la kala dooranayo.
3. Dooro qorshe loogu talagalay adiga naftaada iyo xubnaha kale oo qoyskaaga ka tirsan.
4. Keydso doorashada qorshahaaga isla markaana hel xaqiijinta email-ka.



**Telefoon ahaan: 877-647-0027 (TTY 711)**



**Iyada oo la adeegsanayo qof lagu kalsoon yahay oo bulshada u adeega: Waxaad mid ka heli kartaa [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov)**

### Taariikho muhiim ah oo loo qabtay:



Haddii aadan dooran qorshaha CCO oo kale marka la gaaro Noofambar 17, qorshahaaga lagu barbar dhigayo wuxuu bilaabmi doonaa Janaayo 1, 2020.



Inta u dhaxaysa Janaayo 1 and Maarso 31, 2020, waxaad isku dayi kartaa qorshahaaga CCO adiga oo beddeli kara sabab kasta ha ahaatee.

*Foomkan ha ku soo dirin fax ama boostada. Waa waxyaalo ku caawinaya, ma ahan foom isqoritaanka.*



Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Qorshaha Caafimaadka Oregon kala xiriir 877-647-0027. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.